

FURSADO SHAQO EE DHISMAHA TERMINAALKA 117:

TABBAR XIRFAD BARASHO HOR LEH IYO XIRFAD SHAQO BARASHO

Port of Seattle waxay dhisi doontaa darjin/beer dadweyne iyo meel salmon lagu hayo oo dhinac yaal Wabiga Duwamish ee South Park. Mashruuca, Terminal 117, waxay shaqaaleysiin doonaa xubnaha ururka shaqaalaha xirfadda u leh inay dhisaan. Mashruuca dhismaha wuxuu socon doonaa Xagaaga 2020 ilaa Jiilaalka 2021.

Si ururka shaqaalaha aad ugu biirto, waxaad tabbarkaaga ku bilaabi kartaa sida barnaamijka "Tabbar Xirfad barasho Hor leh" ANEW, ama waxaad si toos ah aad ula xiriiri kartaa ururka shaqaalaha si aad u baratid sida loo bilaabayo "Tabbabarka".

Wax badan oo ku saabsan dhabbaha xirfaddaha howshan shaqo waxaad ka oggaan kartaa qaybta hoos!



ANEW'S BARNAAMIJKA TABBAR XIRFAD BARASHO HOR LEH

Yay yihiin iyagu

ANEW, oo ah urur aan macaash doon ahayn, waxay fidiyaan tabbar xirfad barasho hor leh oo shaqsiyaadka ka caawinaya inay xirfaddo shaqo ka helaan shaqooyinka dhismaha. Barnaamijyada tababarka waa barnaamij u baahan balanqaad 11-todobaad, oo 3-maalmoood-todobaadkii ah. Tabbabarku waxaa lagu qabanayaa Kent ama Seattle. Barnaamijku wuxuu dadka qaangaarka ah ka caawinayaa inay helaan aqoonta, kartida, iyo xirfadaha farsamo ee loo baahan yahay inay noqdaan kuwasida guusha leh ugu tartarmaya, in si guul leh ay codsadaan, oo loogu oggolaado barnaamijka xirfad-barasho. Tabbarqaatayaasha waxay wax ka baran doonaan qiyaastii 10-12 nooc oo xirfaddo ah, oo ay ku jiraan xirfaddaha hoos ku qoran. Tabbarka waa tabbar aan lacag la isku siinayn, laakin dhammaadka tabbarka waxaa lagu siinayaa seddex shahaado oo adiga kaa dhigaya in aad u tartanto Shaqo xirfadeed.

Si aad isku qorto, waa inaad xaadirtaa kulanka 20 daqiiqo socodnaya oo qatka internetka ah oo xogta barnaamijka

laguugu sheegayo iyo in foormkaaga isku qorida oo boggeena ku jira soo dhammaystirtaa oo iimeel ahaan ku soo gudbisaa.

Shuruudaha aassaasiga ee u qalmitaanka





- Waa in aad ahaataa 18 sanno jir ama ka wayn
- Haysataa GED ama Shahaadada Dugsiga Sare (ama dhammaystirtaa ka hor inta barnaamijka aanu bilaabmin)
- Aad haysataa Ruqsadaada Baabuurwadista Gobolka Washington ee aan dhicin (ama soo celisataa ruqsada ka hor inta barnaamijka aanu bilaaban)
- Haystaa wax ku geeya/ku soo celiya (transportation) oo la isku halayn karo
- Aad awooddaa in aad ku baasto baaritaanka maan-dooriyaha

Macluumaad dheeraad ah

Booqo: www.anewaop.org

Facebook: [@ANEWAOP.org](https://www.facebook.com/ANEWAOP.org)

TERMINAL 117 URURADA DHISMAHA-EE LA XIRIRA URURO IYO TABBAR XIRFAD BARASHO HOR LEH



CEMENT MASONS & PLASTERERS, LOCAL 528

Yay yihiin iyagu

Waa ururka shaqaalaha oo waxay metelaan cement masons and plasterers oo ah kuwa sameeya oo dhammeeya shameendada sida laga soo xigtay tafaasiisha jidadka, dhismayaasha, guryaha, aagagga isboortiga, iyo buundooyinka.

Wax ku saabsan Barnaamijka Tabbabbarka

- Cement Masons and Plasterers waa barnaamijyo afar sano ah oo uu tabbarqaataha uu qaadanayo afar asbuuc oo tabbar fasal ah oo lagu qaadanayo Xarunta Tabbarka ee ku yaala Georgetown.
- Si aad isku daydo Barnaamijka Xirfad shaqo barashada, codsada waa inuu soo buuxiyaa shuruudaha u qalmitaanka oo uu soo celiyaa arjiga oo dhammay-

stiran, oo uu helaa iimeel ama warqad casuumaad ah oo sheegaysa inuu yimaado maalinta Isku Dayga barnaamijka Xirfad shaqo barashada.

Ogsoonaw: Sababo uu jiro COVID-19 darteed, Cement Masons and Plasterers fasalada tabbabbarka ee xilliga gu'ga dib ayaa loo dhigay ilaa taariikh dambe.

Wixii macluumaad dheeri ah

Booqo: www.cmpltraining.org

Wac: (206) 762-9286

Facebook: [@cmpltrainingwa](https://www.facebook.com/cmpltrainingwa)



SHAQAALAHA, LOCAL 242

Yay yihiin iyagu

Shaqaalaha Farsamada Gacanta ee dhismaha ayaa ah xirfadlayaasha ugu badan ee shaqooyinkan. Waxay goobaha dhismaha ka socda ay ka ciyaaraan doorar shaqo oo muhiim, oo ay ku jiraan:

- Nadiifinta iyo diyaarinta goobaha dhismaha
- Ka saarida khataraha suurtagalka ah
- Isku qas iyo dhiggida shubka
- U dhigida silgaha si ay u taageeraan dhinac qodista
- Qalab xirida
- Samaynta ama udub u dhigida shubka
- Dhismo ama dhismooyin duminta iyo ka qaadista
- Caawinta shaqaalaha kale ee farsamada (tusaale ahaan, kaarbintarrada, sallaaxida dhismaha, injineerada howlwadeennada iyo dhagaxdhigayaasha)

Wax ku saabsan Barnaamijka Tabbabbarka

Inta ay koorsada qaadanayaan, ardayda waxay heli doonaan guryo ama hoysiin bilaash ah, cunno, tabbabar iyo shaqo lagu geeyo/meelayn iyo jeeg mushahar. Uma baahnid xirfaddo ama aqoon in aad horey u la'haatid, oo xarunta tabbabbarka waxay ku taalaa Kingston, Washington.


Ogsoonaw: Sababo la xiriira COVID-19 darteed, dhammaan fasalada tabbabarada oo dhan dib ayaa loo dhigay. Ka fiiri boggooda internetka (www.nwlett.org) taariikhaha cusub ee la qaban doono.

Wixii macluumaad dheeraad ah

Booqo: www.nwlett.org

Wac: (360) 297-3035

Facebook: [@laborerslocal242](https://www.facebook.com/laborerslocal242)



FUUNDI, LOCAL 30 PACIFIC NW REGIONAL COUNCIL

Yay yihiin iyagu

Guddiga Pacific Northwest Regional Council of Carpenters waxaa ku jira fuundiyaal, shub dhigayaal, derbidhisiyaal, isku xirayaal, shaqaalaha bandhigyada dhismaha, maraakiibta dusha sare, takhasusayaal dhismaha gudaha/dibbadda, khabiirada biraha, shaqaalaha warshaddaha iyo biraha, diidida qalabyaqaanka gudbinta korontada oo gaarya ilaa 28,000, iyo shaqaalaha farsamada gacanta.

Wax ku saabsan Barnaamijka Tabbabbarka

: Tabbabarka shaqo ayaa ah sida ugu fiican ee aad ku bilaabi karto xirfadda faryaamanimo Haddii aad khiBrad u leedahay goobta shaqada ama aadan waligaaba

isticmaalin qalab, barnaamijyada tabbabarashada waxaa loogu talagalay inay ku siiyaan xirfaddo aad ku guulaysato. Barnaamij kasta waxaa loogu talagalay xirfadaha shaqada isla markiiba ku geynaya ama kugu meelaynaya goobta shaqada. Inta badan barnaamijyada tabbabaradu waxay socdaan afar sano iyaga oo ku siinaya aqoonsi “socdaal” markaad dhammayso barnaamijka taas oo awood kuu siinaysa suurto gal ah in kastaba mushahar lacag oo aad u badan.

Wixii macluumaad dheeraad ah

Booqo: www.nwcarpenters.org

Wac: (253) 945-8800

Facebook: [@NWCarpenters](https://www.facebook.com/NWCarpenters)



INJINEERADA HOWL WADEENADA, LOCAL 302

Yay yihiin iyagu

Ururka Caalamiga ah ee Injineerada Howlwadeennada waa urur shaqaale injineero oo ugu horeynba matalaya:

- Injineerada howlwadeennada ee ka shaqeeya howge-linnada qalabyada culus
- Makaanikyada iyo sahamiyaasha shaqooyinka dhismaha
- Injineero taagan, kuwa ka shaqeeya howlaha iyo dayactirka dhismaha iyo warshadaha iyo warshadaha adeegga

Wax ku saabsan Barnaamijka Tabbabbarka

- Wax ku saabsan Barnaamijka Tabbabbarka:
- Barnaamijkan waa barnaamij ah “Kasbo Intaad Wax Baranayso” oo ah nooc barnaamij ku bilowdo mushahar gaaraha \$29+ saacaddiiba iyo ay dheertahay xirmo manfac wanaagsan.
- Maadaama aan nahay urur shaqo u diriyaah, anagu ma ahan in aan shaqo raadinno—iyagaaba taas kuu samaynaayo.
- In la dhammaystiro habka xulashada waxay qaadataa dhowr bilood. Kuwa buundada ugu sareeya keena ee tan la xiriiirta baaritaanka taariikhda shaqsiga iyo wareysiga la la yeesho ayaa dhici karta in lagu casuu-

mo inuu ka qaybqaato toddobaadka Ami Sugida iyo Jiheynta (Safety and Orientation) oo lagu qaban doono Xarunta Tabbarka ee ku yaala Ellensburg. Toddobaadka Ami Sugida iyo Jiheynta waxaa loogu talagalay inay fursad u noqoto soo codsadaayaasha inay wax ka bartaan xirfadda shaqo iyo in shaqaalaha ay qiimeen ku sameeyaan codsi soo qortaha. Ka hor inta codsadaa aan soo xaadirin fasalka ama inta aanu bilaabin, codsadaa waa inuu soo gudbiyaa foormka oggolaanshaha caafimaadka oo uu soo buuxiyay takhtar oo soo baasaa baaritaanka kaadida ee laga soo qaaday.

Wagtiga kama-dambaysta ah ee heerka-galida ee fasalka 2021 waa 13la Noofembar, 2020. Hadda ka soo codso qatka internetka. Codsiyada la xushay waxay tabbarka ay bilaabi doonaan Abriil 2021.

Wixii macluumaad dheeraad ah

Booqo: www.oetraining.com

Wac: (509) 968-3203

Facebook: [Operating Engineers Regional Training Center](https://www.facebook.com/OperatingEngineersRegionalTrainingCenter)

Xarunta Tabbarka Deegaanka ee Injineerada Howlwadeennada



KOOXAHA (WADAYAASHA GAWAARIDA) LOCAL 174

Yay yihiin iyagu

Washington Construction Teamsters Barnaamijka Xirfad shaqo barasho ayaa ah 3,000-saac oo ah tababar shaqo dhexdeeda ah lagu qaato oo laga barto Qalabyada Dhismaha oo Dhan, oo ay ku jiraan baabuurta waawayn, gawaarida xamuulka qaada, gawaarida isgediska, iyo kuwa shamiindada.

Wax ku saabsan Barnaamijka Tabbabbarka

- Ardaydu waxay ka shaqeyn doonaan goobaha dhismaha ay ka socoto oo ay ka baran doonaan shaqsiyaadka xirfadleyaasha ee kooxda shaqaalaha.
- Ardayda waxay xaadari doonaan tababar dheeri ah oo oo ugu yaraan qaadanaya 144 saacadood sanadkii.
- Fasalladu badanaa waxay bilaabmaan xilliga gu'a (Hal ilaa seddex fasal sanadkiiba). Fasallada Xirfad shaqo barashada waxaa raacaya tababar shaqo dhexdeeda ah.
- Ardayda wax lacag ah laguma siinayo markii ay dhigayeen fasalka tabbabarka ee 6da asbuuc. Haddii aad

joogtid meel ka baxsan aagga gudbinta ee Tri-Cities, waxaa lagu siinayaa \$350 asbuucii si lagaaga caawiyo kharashaadka safarka. Ardayda mashahar baa lagu siiyaa 3,000 saacadood oo tabbabarka shaqo.

Ogsoonow: Sababo uu jiro COVID-19 ka darteed Xarunta Tabbarka ee Teamsters Training Center hadda way xiran tahay mana jiri doonto wax fasal ah sannadka 2020; ardayda 2020 ayaa la tabbabari doonaa sanadka 2021. Waxaa laga yaabaa inay jiri doonaan dhawr boosas oo banaan 2021 (haddii ay jiraan arday 2020 ahayd ee isaga baxay fasalka).

Codsadeyaasha daneynaya waa inay soo dalbadaan Disembar 2020 intaan la gaarin.

Wixii macluumaad dheeri ah

Booqo: www.teamsterstraining.org

Wac: (509) 528-4190

Facebook: [@TeamstersLocal174](https://www.facebook.com/TeamstersLocal174)



SU'AALAHA BADANAABA LA ISWEYDIIYO

Waa maxay dukumintiga inta badan looga baahan yahay diiwaangelinta ama isku qorida tabbabarka shaqo?

Urur kasta wuxuu leeyahay foomam isqoritaan oo u gaar ah, kaas oo aad ka heli karto boggooda internetka. Codsadeyaasha badankooda waxay u baahan yihiin nuqul ka mid ah: ruqsadaada baabuurwadista oo aan dhacsanayn, Kaarka Sooshiyal Sekuuritiga ama dukumiintiyo kale oo ah I-9, diblooma shahaadada dugsiga sare ama wax u dhigma, warqadda buundada imtixaanada ee rasmiga ee GED ga.

Muwaadiniin shisheeye ma la shaqeyn karaan ururada shaqaalaha?

Lambarka Soshal Sekiyuuratiga ama dukumentiga I-9 ayaa loo baahan yahay si loogu soo biiro ururrada intooda badan. Haddii cidda aad u shaqayso ay caqabad kugu noqdaan sabab soshal sekiyuuratigaaga darteed, waa inaad buug yaraha ka eegtaa [OGOW QORAALKA XUQUUQDAADA \(KNOW YOUR RIGHTS handout\)](#).



STAY CONNECTED WITH YOUR PORT

Sign up for **email and Text** updates at our web page or follow us on social media

www.portseattle.org/subscribe | @PortofSeattle | @FlySEA

Last updated: August 7, 2020